

Ma garanaysay?

- Sanad walba, PPO waxay la macaamishaa kumanaan **cabasho maxbuus** .
- Jawaab kabixin cabashooyinkaan, PPO waxay samaysay ku dhawaan kun **talooyin kusocda maxbuuska** sanadkii lasoo dhaafay
- Natijoooyinka baaritaanadeena waxay xabsiga ka dhigaan meel **cadaalad,nabad u ah** maxbuusta darafyada wadanka oo dhan.

`aniga, iyo saan hubo maxbuus kale oo badan, nasiib ayaan leenahay in aan haysano urur aan kaalmo ka raadsan karno. Waad mahadsantahay.`

Maxbuuska A,
HMP Northumberland

Runta kusaabsan PPO

- Uma shaqayno Adeega Xabsiga (Prison Service), Uma shaqayno NOMS. PPO si **buuxda ayeey u madax banaantahay**.
- Cabashooyinkaaga **xabsigu ma akhrinayo**, loomana isticmaalayo si liddi kugu ah.
- Sanada kasta waxaan maxbuusta ka helnaa kumanaan cabasho. **Taadana WAAN heli doonaa**.
- Hadii aan kuwaafaqno, waxaad heli kartaa **raali galin;qasaarahaaga lagu gudo;xitaa isbadal siduu xabsigu u shaqeeyo**.
- Waxaan doonaynaa inaan cabashadaada uga soo jawaabno **10 maalin gudahood** marka helno.

Waayahay, marka maxaan ka caban karaa?

Waxaad ka caban karto?

Waxaad uga caban kartaa PPO arrimo nuuc kasta ah- oo ay ka mid yihiin sida shaqaaluhu kuula macaamilayaan iyo hanti kaa dhuntay.

Laakiin, waxaa jira waxyaalo aanaan baari karin :

- Go`aamada Guddiga Siidayn sharafeedka.
- Cabashooyin kusaabsan daryeelka caafimaad.
- Qaanuun guud, hadii ay tahay in kabadan 3 bilood markii aad ka heshay xabsiga jawaab kusaabsan cabashadaadii asalka ahayd.
- Cabashadu waa inay ahaataa wax adiga kugu dhacay, maahan qof kale.

Sida loo cabto.

Marka sidee ugu cabtaa PPO?

Hubi inaad raacdid **sadexda tilaabe ee fufud**. Hadii adadan saas samayn, way baari karaan.

1 Hubi inaad wada martid habraaca cabasho ee maxkamad marka hore.

Qor qoraal yar oo noo sheegaya

2 waxay kusaabsantahay cabashadaadu, iyo sababta aadan wali u faraxsanayn.

3 Noo soo dir waraaqahaaga oo dhan-oo ay kujiraan dhamaan foomamka cabashada xabsi.

Meesha loo diro cabashadaada.

Xagee kudiraa waraaqahayga oo dhan?

Kusoo dir **dhamaan waraaqahaaga cabashada cinwaankaan**

Prisons and Probation Ombudsman
PO Box 70769
London
SE1P 4XY

Waraaqaha aad u dirto Ombudsmanka waa lacag la'aan.

'Waad kumahadsantahay dhamaan waqtigaaga iyo dadaalkaaga aad galiso samaynta baaritaankaaga, aad ayaa looga mahadnaqayaa'.

Maxbuuska B, HMP Kennet

Prisons &
Probation
Ombudsman
Independent Investigations

**Sida loogu cabto
Ombudsmanka
(wakiilka cabshooyinka)**

